DIMUQRAADIYAYNTA PUNTLAND

CAQABADAHA TAAGAN IYO TALOOYIN

06 MAARSO 2022

HORDHAC

Soomaaliya waxay ka mid tahay dawladaha kasoo doogtay colaadaha, burburka iyo dagaallada sokeeye, waxayna qayb ka noqotay dawladaha lagu suntay fashalka (failed states), soo kabashada dawladaha noocaan ah wuxuu u baahanyahay waqti dheer iyo dadaal badan si ay ugu guulaystaan dawlad-dhis iyo maamul-wanaag u horseedi kara horumar iyo barwaaqo.

Intabadan waxaa luma kalsoonida iyo xiriirka u dhexeeya dawladda iyo bulshada (state and society), waxaana lagu sababeeyaa kalsooni-xumada labada daraf dhowr arrimood oo ay ka mid yihiin: musuqmaasuqa, kaqayb-galka bulshada talada dalka iyo go'aammada masiiriga ah oo liita, muwaadiniinta oo aan helin xuquuqdooda dastuuriga ah, adeegga dawladdu bixinayso oo hooseeya iyo ku-dhaqanka iyo hirgelinta sharciga oon waxbadan ka jirin.

Haddaba; si loo dhiso kalsoonida u dhaxaysa dawladda iyo bulshada, loona taabbageliyo dawlad-dhiska iyo maamul-wanaagga, waxaa habboon in dalka loo jiheeyo hannaan dimoqraadi ah oo shacabka talada wax uga oggolaanaya si ay cidda ay ku kalsoon yihiin ugu doortaan xilalka dawladnimo.

Dadweynuhu inay doortaan dadka xukumaya waa xaq dastuuri ah. Nus qarni in ka badan lagama qaban doorasho toos ah deeganada Puntland, iyo guud ahaan Soomaaliya marka laga reebo deegaanada Somaliland. Waa waqti aad udheer. Ma sahlanayn in laga dhabeeyo qabashada doorasho toos ah, 2 jeer oo hore ayaa 2 guddi-doorasho oo naga horeeya dadaal badan geliyeen umase suuroobin.

Puntland oo ah Dawlad jirtay 23 sano, waxay u jihaysatay doorasho qof iyo cod ah oo si hordhac ah looga qabtay degmooyinka Ufayn, Qardho iyo Eyl. Doorashada ka bilaabatay Puntland waxay bulshada fursad u siisay inay xaq dastuuri oo ka maqnaa mudda badan hantaan, cidday ku kalsoon yihiinna talada u dhiibtaan, lana xisaabtamaan.

Muddadii 2da sano iyo barka ahayd ee aan hogaaminayay Guddiga KMG Doorashooyinka waxay ahayd muddo mashquul badan, caqabado iyo guulana aan soo marnay. Ka sokow duruufihii adkaa ee aan kusoo shaqaynay haddana waxaa noo qabsoomay waxqabadyo muhiim u ah hayaanka dimuqraadiyadaynta Puntland. Waxqabadyada noo qabsoomay waxaa ka mid ah:

1. Dhamaystirka habraacyadii, xeerarkii iyo siyaasadihii muhiimka u ahaa doorashada golayaasha deegaanka.
2. Dhismaha ururo siyaasadeed oo dhan 9 urur taas oo dadwaynaha u sahlaysa inay ku biiraan ama doortaan ururkii ay ku qancaan mabaadi'diisa iyo barnaamijkiisa siyaasiga ah.
3. Diiwaangelinta codbixiyayaasha 3dii degmo (Qardho, Ufayn iyo Eyl) ee loo asteeyay in laga qabto doorashada hordhaca ah, kuwaas oo dhan in ka badan 46 kun oo codbixiye.
4. Qabashada doorashadii 3da degmo oo si nabad ah ku qabsoontay. In ka badan 26 kun oo muwaadin ayaa si nabadgalya ah codkooda ku dhiibtay.
5. Soolaabashada kalsoonida dadwaynaha iyo daneeyayaasha dimuqraadiyadda Puntland.
6. Qabsoomidda doorashadii taariikiga ahayd ee ka qabsoontay Puntland 25/10/2021, waxay sidoo kale tusaale u noqon kartaa Soomaalida inteeda kale in doorasho hal qof iyo hal cod ah dalka laga qaban karo, in hoos laga soo bilaabo oo golayaasha deegaanka lagu bilaabona waa tallaabo fiican.

CAQABADAHA TAAGAN

Ka sokow guulaha noo hirgalay, haddana waxaa jiray caqabado nasoo wajahay muddadaas. Caqabadaha waxaa ka mid ahaa kuwo farsamo oo intooda badan lagu dhex xallinayay shaqada gudaheeda, haseyeeshee kuwaan hoose waa kuwo aan usoo xushay inay yihiin kuwo saamayn toos ah kulahaa walina kuleh habsami usocodka dimuqraadiyadda Puntland:

1. Aqoonta bulshadu u leedahay doorashada oo yarayd maadaama aysan doorasho toos ah muddo dheer dalka ka dhicin, bulshaduna iska hilmaamtay. Xataa hawl-wadeennada iyo Guddiga Doorashada oo inkastoo ay aqoon u lahaayeen maamulka iyo maaraynta aan haddana waayo-aragnimo u lahayn qaabka doorasho loo maamulo.
2. Dadka codaynayay oo in badan oo ka mid ah ahaa dadka deggan tuulooyinka iyo baadiyaha, intooda badanna wax ma qoraan waxna ma akhriyaan, waxaa marka adkaatay inay codeeyaan, ama ay fahmaan farriimaha wacyigelineed ee ku wajahnaa, waana arrin u baahan qorshe qaran.
3. Kalsoonida dadwaynaha iyo daneeyayayaasha ee suurtagalnimada hirgalinta hannaanka dimuqraadiyada oo markii aan shaqada bilownay aad u hoosaysay kuna dhowayd quus. Waqti iyo dadaal badan ayaan galinay in dib loosoo celiyo kalsoonidaas.
4. Maqnaashaha Maxkamadda Dastuuriga ah iyadoo weliba waqtigii Maxkamadda Sarena uu dhammaaday Agoost 15keedii 2021, waxay muujinaysaa inuusan jirin hannaan garsoor oo sharciyad u leh inuu qaado murannada iyo dacwadaha la xiriira arrimaha dastuurka iyo doorashooyinka.
5. Guddiga doorashooyinku inta badan ma helin dhaqaalihii ugu jiray miisaaniyadda dawladda. Tusaale ahaan sannadkii 2020 Guddiga waxaa soo gaartay kaliya 16% miisaaniyaddii sannadkaas oo dhamayd $1,631,804 (hal malyan lix boqol soddon iyo kow kun siddeed boqol iyo afar dollar). Taasi waxay culays badan ku keentay habsami usocodkii shaqada Guddiga; sida shaqaale yaraan, agab yaraan, yaraynta hawlgalada la xiriira wacyigelinta iyo dib u dhac ku yimid hawlgelinta xafiisyadii degmooyinka ee Guddiga.
6. Dawladda oo aan shaacin xuduudaha degmooyinka si loo xalliyo cabashooyinka ka yimaada xuduudaynta ay samaysay Wasaaradda Arrimaha Guduhu, tusaale ahaan: Guddiga doorashooyinka waxaa loo soo gudbiyey cabashooyin la xiriira xuduudihii 3da degmo ee ay doorashadu ka dhacday, gaar ahaan deegaannada hoos yimaada Qardho iyo Ufayn, taasi waxay muujinaysaa in cabashooyin badan ka imaanayaa xuduudaha marka la shaaciyo.
7. Ka sokow rabitaanka dadwaynaha ee hirgelinta hannaankaani inuu aad u sareeyo sida ay tilmaamayso cilmibaaris iyo xog-ururintii ugu dambaysay ee ay samaysay hay'adda PDRC ayna faafisay Luulyo 2021, haddana wacyiga iyo fahanka dadwaynuhu wali waa hooseeyaa waxayna u baahan tahay shaqo badan.
8. Wacyiga hooseeyaa wuxuu keenay in dadweynaha/xubnaha ka tirsan ururada siyaasadda uusan dhaqaale iyo maalgashi ku bixin ururka uu taageero/ka tirsanyahay, culayskii maalgelinta ururaduna uu dusha ka fuulo xubno kooban oo ururka ah, taas oo keentay gaabis la xiriira shaqooyinkii laga rabay ururadu inay qabtaan.
9. Ururada Siyaasadda qaybo ka mid ah ma rabin qabashada doorashada horudhaca ah sababkasta haku kallifto, ururadaasi waxay marwalba hordhigayeen caqabado iyo jidgooyooyin lagu hor istaagayo qabsoomidda doorashada. Ururadaas qaybtood uma muuqan kuwa uba diyaarsan doorasho maadaama ay xireen inta badan xafiisyadoodii.
10. Damaca Madaxweynaha Puntland inuu u tartamo madaxnimada Dawladda Federaalka ah waxay hirgelinta hannaankaan ku yeelatay saamayn taban. Shaqo iyo taageero badan oo dhanka xukuumadda laga rabay ayaa u weecday dhanka damaca Madaxweynaha ee doorashada Federaalka. Sidoo kale dad ay ka mid yihiin saaxiibada dhow ee Madaxweynaha oo hannaankaan aan marna rabin ayaa ku dhiirraday ka shaqaynta fashilinta hayaanka dimuqraadiyadda Puntland.
11. Ugu dambayn, fariisinta la'aanta golayaashii dadweynuhu doorteen oo ay ahayd in 30 maalmood gudahood loo qabto kulankooda 1aad, sida uu qabo Xeerka Maamulka Dawladaha hoose qodobka 43aad, waxay muujinaysaa dabac weyn oo ku yimid ka go'naashihii dawladda ee hirgelinta hannaanka xisbiyada badan ee Puntland.

DIMUQRAADIYAYNTA PUNTLAND

CAQABADAHA TAAGAN IYO TALOOYIN

06 MAARSO 2022

TALOOYIN

Iyada oo ay jiraan caqabadaha kora an kusoo xusay, haddana waxaan aaminsanahay in ay wali fursadi jirto. Hoos waxaan kusoo koobayaa talooyin aan usoo jeedinayo qaybaha kala duwan ee daneeyayaasha hannaanka dimuqraadiyadda Puntland:

1. Dawladdu waa inay ugu horrayn si degdeg ah u fariirisaa golayaashii dadwaynuhu doorteen ee sida sharci darada ah dibadda uga jooga shaqadii dadku u doorteen. Haddii ay dawladdu fariisin waydo, waxay xaq uleeyihiin inay iyagu iskuyeertaan oo qabsadaan kulankooda.
2. Dawladdu waa inay magacawdaa xubnaha sare ee Maxkamadda Sare sidoo kalana dhistaa Maxkamadda Dastuuriga ah si loo helo hay'adihii garsoorka ee xallin lahaa khilaafaadka ka dhasha doorashada.
3. Dawladdu waa inay usii daysaa Guddiga Doorashooyinka dhaqaalaha ugu jira miisaaniyadda dawladda ee ay ansxiyeen golayaasha dawladdu, dhaqaalahaas waxaa sidoo kale laga kabi karaa Ururada Siyaasadda oo ay haysato duruufo dhaqaale oo adag.
4. Dawladda waxaa laga rabaa inay dhamaystirto baahisana xuduudaha degmooyinka Puntland oo dhan, wixii cabasho ahna la xaliyo xilli hore.
5. Dadwaynaha Puntland waxaa looga fadhiyaa inay dawladda ku cadaadiyaan hirgelinta hannaanka dimuqraadiyada oo ay doorashadu saldhig u tahay.
6. Ururada Siyaasadda Puntland waa saldhigga hannaanka dimuqraadiyaynta Puntland, waxaana laga rabaa inay qaataan kaalinta uga beegan doorashooyinka, dawladdana ku cadaadiyaan hirgelinta doorasho qof iyo cod ah.
7. Bulshada rayidka ah ee Puntland, waa inay xoojisaa korjoogtaynta hannaanka dimoqraadiyaynta ee hayaanka loo yahay, qaybna ka qaataan in dawladda lagu boorriyo fulinta ballanqaadyadeedii.
8. Deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha caalamiga ah waxay udub-dhexaad u yihiin maalgelinta mashruuca dimuqraadiyaynta Soomaaliya, waxaan u soo jeedinaynaa inay Dawladda ku boorriyaan fulinta doorashooyinka siday u ballan qaadday, dhanka kalana ay sii wadaan taageeradoodii farsamo iyo dhaqaale ee dimuqraadiyaynta Puntland.
9. Soomaalida taariikh xun ayaa kasoo martay doorasho la musuqmaasuqo, ama la diido hirgalinteeda, waana waxa ay ilaa iyo hadda dawladnimadeedii la taabba geli la'dahay, waxaan haddaba dawlad iyo shacabba u dardaarmayaa in lagu fara-adaygo doorashada Puntland iyo guud ahaan hannaanka dimuqraadiga ah ee hadda curtay.

GUULEED SAALAX BARRE

GUDDOOMIYIHII HORE EE GUDDIGA KMG
DOORASHOOYINKA PUNTLAND

Guled Salah

guledsalah.so